

Farriin Ku Saabsan Doorshada Dadban Ee 2016

Haweenku Qayb Weyn Bay Ka Yihii Bulshadeenna. Waana Lagama Maarmaan In Ay Ka Mid Noqdaan Golayaasha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Si loo xaqiijiyo qoondada kuraasta haweenku ku yeelanayaan Golayaasha Baarlamaanka Federaalka Madashu Hoggaanka Qaran waxay guddoomisay in:

Beeshii Golaha Shacabka ku leh saddex (3) kursi, waa in kuraastaas midkood ahaado kursi haweenka reerkaas oo keliya ku tartamaan.

Beelaha kale ee bah ahaan isu xiga waxaa kuraastooda laysugu celcelinaya sida ay isu xigaan oo ay isu leeyihiin, ka dibna sadaxdii kursiba waxaa laga doonaya in laga soo saaro hal kursi oo ay haweenka keliya ku tartamaan.

Beelihiidii diida soo bandhigidda kursiga haweenka, kuraasta beelahaasi waa la laalaya illaa iyo inta Guddiga heer Dowladgoboleed ee Hirgelinta Doorshooyinka Dadban iyo Dawlad-Goboleedku ay go'aan kama dambays ah ka gaarayaan kursigaas.

Arrinta Aqalka Sare: Madashu iyadoo adkaynaysa go'aankeedii hore ee ku saabsanaayaa qoondada haweenka ee Aqalka Sare, waxay Madashu isku raacdya in madaxweyne kasta ee dowlad-goboleed uu soo magacaabo xubnaha u tartamaya Aqalka Sare, iyadoo la suurto gelinayo in saddex kamid ah kuraasta dowlad-goboleed kasta; kuwa jira iyo kuwa samaysmayaba, ay u tartamaan haween oo keliya.

135 hoggaamiye dhaqameed oo la tashanaya nabadoonnada matalaya jilib hoosaadyada reerka leh kursi baarlamaan ayaa soo xuli doona 14025 ergey. Ergadaasi waxay dooran doontaa 275 ta xildhibaan ee uu ka kooban yahay Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Kursi kasta oo Aqalka Hoose ah waxaa loo xuli doonaa ergo dhan 51xubnood oo kala dooran doona musharraxiinta u tartamaya kursigiiba.

Waxaa shardi ah in ugu yaraan 16 haween ahi ay ka mid noqdaan 51ka ergo ee xildhibaan dooran doona, si loogaaro qoondada haweenka ee 30% Ka ah ee kuraasta Aqalka Hoose. Sidoo kale waa in 10 xubnood dhallinyaro ahi in ay ka mid noqdaan ergada codeynaysa ee 51ka ah.

Haddaba, Isimada iyo nabdoonnada waxaa maanta horyaal go'aanno taariikhi ah oo masiirka ummadda taabanaya. Odayaasha dhaqankow ku dadaala tubtii lagu soo saari lahaa rag iyo haween xildhibaanno ah oo ummaadda matali kara. Soo xula Rag iyo haween haldoor ah oo dooran kara xildhibaanno qaran.

